

**“Kharashka Adeegga”  
Su’aalaha Aalaaba  
Layswaydiiyo**

**Ka warran hadduu ilmahaygu isticmaali shitaawaha gelinka hore ama gelinka danbe., amaba dhowr cisho oo qura toddobaadkii?**  
Kharashku waa isku mid intii la doono halla raacee.

**Ka warran haddii ilmahaygu ku jiro xarunta daryeelka?**  
Kharashku wuxuu ku salaysan yahay cinwaanka gurigaaga, xarunta daryeelku meeshay doonto haku taallee.

**Ka warran hadduu ilmahaygu ka dhexeeyo labo aqal? Midna ku guda jiro labada mile, midka kalena ka baxsan yahay labo mile.**  
Kharashku sidiisuu ahaanayaa, marba haddii cunuggaaga laga soo qaadayo cinwaanka ku guda jira labo mile.

**Ka warran haddii aan go’aansado in ilmahaygu shitaawaha raaco kaddib bilowga sannad dugsiyeedka?**  
Dhammaan rakaabka ku jira meelaha kharashkooda ayaa ka mas’uul ah kharashka adeegga sannadka oo buuxda markay doonaan isqoristu gaadiidku haka bilaabatee.

**Ka warran haddii qoyskaygu u guuro meelaha kharashka kaddib bilowga sannad dugsiyeedka?**  
Haddii aad ku cusub tahay Dugsiyada Eden Prairie, ama aad dhawaanta usoo guurtay meelaha kharashka, waxaa laga yaabaa inaad u qalintid kharashka adeeg la isku celceliyay. Fadlan wac (952) 975-7025 si aad u heshid cadadka kharashka. Kharashka ugu yar waa \$50.

**Sidee meelaha kharashka lagu garwaaqsadaa?**  
Barnaamij computer oo adeegsanaya macluumaadka masaafada sannadlaha ah ee degmadu oo la cusboonaysiiyey ayaa loo adeegsadaa. Masaafada waxaa laga soo cabbiraa kaabiga dugsiya ilaa iridda aqalka ee ilmuhu isticmaalo, iyo sidoo kale wadiiqada ugu dhow ee ka baxdaa labada mile oo laga cabbir qaato bartamaha waddada. Bartamaha wadiiqada waxaa loo isticmaalaa sababtoo ah waxay keenayaan qiyaasta celceliska masaafada intay doonto docda wadiiqadu ilmuhu ku nool yahay ama kasoo lugeeyo ha le’ekaatee. Keliya guryaha gebi ahaanba ku guda jira meelaha kharashka ayaa loo tixgeliyaa inay yihiin “baraha kharashka.”

**Ilmahayga waxaa dhici karta inuu u qalmo cuntada bilaashka ah/ama sicirkeeda la dhimay. Waa maxay waajibaadkaygu?**  
Waa inaad sannad walba buuxisaa arjiga lagu garwaaqsanayo xaaladda cuntada bilaashka ah/ama sicirkeeda la dhimay. Kharashka gaadiidka waa lagaa tuurayaa haddii aad u qalintid cuntada bilaashka/ ama sicirkeeda la dhimay. Haddii kale, adigaa ka mas’uul ah gebi ahaan kharashka Gaadiidka.

Haddii aad wax su’aal ah oo ku saabsan Bixi aad Raacdide qabtid, fadlan wac (952) 975-7025.